

Baro Xuquuqdaada

Xubnaha shaqaalaha DSHS waxaa ka go'an adeeg tayo leh.

Waxa aanu uga fadhinaa shaqaalaha iyo dadka aanu u shaqayno inay is qadariyaan.

Waxa aad xaq u leedahay:

- In laguula dhaqmo si wanaagsan, cadaalad ah oo xushmad leh.
- Aad hesho macluumaad ku saabsan dhamaan barnaamijyada iyo adeegyada ku caawin kara.
- Si aad uga dalbato wax kamid ah Community Services Office (Xafiisyada Adeegyada Bulshada) DSHS, onleyn ahaan washingtonconnection.org ama la hadal 877-501-2233 saacadaha shaqada ee caadiga ah.
- In lagugu caawiyo adiga oo iska yimid, taleefanka ama qabsanaya balan.
- In ruux kuu sharaxo sida aad u dalban karto gunooyinka.
- Inaad hesho arjiga marka aad dalbato.
- Inaad hesho caawimaad buuxinta arjigaaga iyo foomamka kale.
- Inaad keento arjiga iyada oo aan lagu diidin ama lagu sheegin in aanad dalban karin.
- Inaad keento arjiga saacada shaqada isla maalinta aad buuxisay.
- Inaad keento arjiga uu ka maqan yahay macluumaadka qaar. Ugu yaraan, arjiga waa inuu la socdaa magacaagu, cinwaankaagu iyo saxaaxaagu si loo aqbalo.
- Inaad ka hesho kaalmo turjubaan wakhtiga aad u baahan yahay marka aad dalbato ama aad u baahan yahay.
- Inaad ku heli karto waraaqaha daruuriga ah luuqada aad fahmayso.
- In lagu siiyo liiska waxyaabaha loogu baahan karo waraysiga.
- Inaad ka hesho kaalmo DSHS si aad u hesho macluumaadka aad ugu baahan tahay xaqiijinta u qalmitaanka.
- In lagugu warayso taleefanka hadii aanad doonaynin inaad timaado.
- Inaad hesho wargelinta qoraalka ah ee gunooyinkaaga.
- Inaad aragto shuruucda waaxda.
- Inaad aragto macluumaad ku saabsan naftada ee ku jira faylka kiiskagaa.
- Inaad hesho kaalmada nidaamka cabasho hadii aad u aragto in aan si wanaagsan laguula dhaqmin.
- In lagu dhagaysto hadii aanad ku qancin wax talaabo ah oo kiiskaaga la qaaday.

Hadii aad dalbato gunooyinka Basic Food (Cuntada Aas Aasiga ah), waxa aad sidoo kale xaq u leedahay:

- In lagu sheego adeega dedejinta.
- Inaad laguugu dedejiyo Basic Food (Cuntada Aas Aasiga ah) todoba maalmood ama wax ka yar.
- Inaad hesho gunooyinka Basic Food (Cuntada Aas Aasiga ah) (ama in lagu sheego in aanad u qalmin barnaamijka) 30 maalmood gudahood marka aad arjiga keento.
- Inaad ogaato hadii aad weli u qalanto kaalmada cuntada kadib marka uu dhamaato kaalmadaada lacagta cadaanka ahi.



Waxaad sidoo kale kaalmo ka heli kartaa:

- 211 Washington onleyn ahaan www.211.org ama adiga oo la hadlaya 211.

Hadii aad u aragto in si xun laguula dhaqmay oo aad isku af garan waydaan shaqaalaha, ka dalbo inaad la hadasho horjoogaha.

Si aad eegto warqadan taleefankaaga, iskaan garee QR koodhka.

